

Sidee ayaad ugu diyaar garoobi kartaa isbeddelada lagu sameeyay shuruudaha maaskarada?



Maxaa iska beddelay maaskarooyinka?

Laga bilaabo Abriil 3deeda, waxay Oregon meesha ka saari doontaa shuruudaha maaskarada ee goobaha daryeelka caafimaadka. Tan waxa ka mid ah adeegyada naafada garaadka iyo korriinka. Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka (ODDS) ayaa u sameeyay hagahan si uu kaaga caawiyo inaad samaysato doorashooyin aad u aragto inay badbaado kuu yihiin kuguna habboon yihiin adiga iyo qoyskaaga.

Maxay midan kaaga dhigan?



Weli waxaad ku amri kartaa adeeg bixiyahaaga inuu xirto maaskaro. Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa soo booqdayaasha gurigaaga imanaya inay xirtaan maaskaro.



Haddii aad xanuunsan tahay ama aadan caafimaad dareemayn, ilaali dadka kale. Tixgeli xirashada maaskaro. Ka codso kuwa ag joogay qof jirran inay xirtaan maaskaro.



Wakiilkaaga gaarka ah ama isku duwaha adeegyada iyo taageerayaasha kale ayaa ku weydiin doona haddii aad rabto inay xirtaan maaskaro. Haddii aad ka codsato inay xirtaan maaskaro, markaas waa inay xirtaan.

Oregon waxay soo afjaraysaa waajibnimada maaskarada Taariikhdu markay tahay Abriil 3deeda

“Sidee ayaad u sii wadi kartaa in aad badqab ahaato?”


Siyaabaha looga badbaadi karo COVID-19



Waxaad xaq u leedahay inaad ka codsato bixiyahaaga inuu xirto maaskaro. Waxaan idiinku dhiiragelinaynaa xirashada maaskaro haddii adiga ama bixiyahaagu uu caafimaad daro dareemaayo.



Iska dhaq gacmaha si joogto ah



Ilaali kala fogaanshaha masaafada bulshada



Xiro maaskaro markaad xanuun dareento



Haddii aad ku nooshahay ama aad ka shaqayso guriga korinta ama goob deegaan ah oo dadka aad la nooshahay ay xanuunsadaan, waxaanu kugu dhiiragelinaynaa inaad xirato maaskaro.



Bixiyeyaashaadu waa inay idiin weydiyaan adiga iyo qoyskaaga haddii aad rabtaan in ay xirtaan maaskaro ka hor inta aysan gurigiina soo gelin.

Haddii aadan awoodin inaad maaskaro xirato xaalad caafimaad awgeed, bixiyahaagu waa inuu qaadaa talaabooyin kaa caawinaya inaad badqabto. Waxay kaa codsan karaan inaad ka fogaato dadka kale, inaad jeermiska iska disho in badan, oo ay hubiyaan in qof kasta oo kale oo awoodo inuu xirto maaskaro.